

Bell-Bardia, Heidelberg West Marxaladda Koowaad

Xaashida xaqiiqda ee dib u dhiska
guryaha



Homes Victoria waxay bixinayaan guryo dawlad oo cusub oo la awoodi karo kuna yaal Heidelberg West si ay dad badan oo reer Victoria ah u helaan meel sugan oo amni leh oo ay ugu yeeri karaan hoy.

Homes Victoria waxay qorsheynayaan inay bixiyaan 104 guri oo cusub oo ku yaal goobta Bell-Bardia ee Heidelberg West kuwaas oo ka kooban 53 guri oo guryo bulsho/dowlad ah iyo 51 guri oo la awoodi karo. Bixinta guryaha cusub waxay gacan ka geysan doontaa wax ka qabashada in la helo guryo la awoodi karo, iyadoona siin doontaa dad badan oo reer Victoria ah meel ammaan ah, isla markaasna sugan oo ay ku noolaan karaan.

Goobta Bell-Bardia waxay ku taallaa inta u dhaxaysa waddooyinka Bell Street iyo Bardia Street ee Heidelberg West, 10km na ka xigta waqooyi-bari ee Melbourne CBD. Goobtu waxay u dhowdahay tashiilaadka waxbarashada, gaadiidka dadweynaha, adeegyada bulshada, Bell Street Mall, Isbitaalka Austin, iyo meelaha kale ee muhiimka ah oo ay ku jiraan Darebin Creek iyo Northland Shopping Center.

Soo jeedinta horumarinta marxaladda koowaad waxaa lagu bixin doonaa guryo cusub oo ku yaal qaybta bari ee goobta Bell-Bardia, oo ay ku jiraan isku dhafka hal, laba iyo saddex qol oo jiif ah guryo ka kooban iyo goobo cusub oo cagaaran oo ay bulshadu wadaagto. Horumarinta waxaa si wadajir ah loo maalgeliyaa iyada oo loo marayo Dardargelinta Guryaha Bulshada ee Dawlada Dhexe iyo Dhismaha Guryaha Weyn ee Dawladda Victoria (Commonwealth Government's Social Housing Accelerator and the Victorian Government's Big Housing Build).

Iyadoo hada ay socoto la-tashiga bulshada bulshada iyo ansixinta qorsheynta, dhisida waxa loo qorsheeyay inay bilowdaan dabayaaqada 2025 oo ayna dhammaato 2027.

**guryo badan oo wanaagsan oo loogu
talagalay dadka reer Victoria**

Xaqiiqooyinka degdega ah ee guriyeynta cusub



Guryo tamar wanaagsan oo leh kharashka kululaynta laguna qaboojinayo kana raqiisan

lagu qiimeeyay 5 xiddigta cagaaran, 7 xidigood NatHERS celcelis ahaan. qiimeynta, dhammaan guryaha korontada



In ka badan **100 guri**



1, 2 iyo 3 qolal oo jiif ah guryo ah



Wadooyin wanaagsan oo leh


isku xir wanaagsan.



Hoy la heli karo



Muuqaal cusub oo geedo **iyoo doog cagaaran leh**



Khariidad muujinaysa heerka 1-aad ee goobta guryaha Bell-Bardia iyo hareeraheeda

Wax badan ka ogow

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad isu diiwaan geliso wixii soo cusboonaado fadlan booqo website-kayaga



[homes.vic.gov.au/
bell-bardia-heidelberg-west-stage-1](https://homes.vic.gov.au/bell-bardia-heidelberg-west-stage-1)

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan noogu soo dir iimaylka ah westheidelberg@homes.vic.gov.au ama soo wac **1300 870 250**.

Homes Victoria waxay aqoonsan tahay Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka laga dhisayo gurigan. Waxaan xushmad u muujinaynaa odayaashoodii hore, kuwa jooga iyo kuwa imaan doona.

JADWALKA MASHRUUCA



Jun 2024

Ku dhawaaqida mashruuca



Luulyo 2024

Wajiga Koowaad - Wadatashiga bulshada si loo qaabeeyo mustaqbalka goobta.



Sebteembar 2024

Wajiga labaad - Wadatashiga bulshada ee qorshayaasha la soo jeediyay.



Dabayaaqada 2025

Dhisida way bilaabanaysaa (waxaana la sugayaa ansixinta)



2027

Dhamaystirka mashruuca

Jadwalkani waxaa laga yaabaa inuu isbedelo, iyadoo ay ku xiran tahay baahida mashruuca.



Ma u baahan tahay nooca la heli karo ama la fasiray ee cusboonaysiinta mashruucan?

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku hesho daabacaadan qaab la heli karo ama la turjumay, fadlan iimayl u dir enquiries@homes.vic.gov.au